

# Waxaa la soo rogayaa tillaabooyin lagu hakinayo in uu Norway ku faafo nooca koroonaha ee omikron

Si loo hakiyo in uu nooca koroonaha cusub ee omikron waddanka ku faafo, ayaa waxaa la soo rogayaa tillaabooyin badan.

– Waxaa laga yaabaa in noocan cusub ee omikron in uu ka faafi og yahay noocii delta. Waaya-aragnimada ilaa iyo hadda laga bartay safmarka koroonaha ayaa waxay tahay in marka is-qaadsiinta cudurku badato in uu ku fidi doono adduunka oo dhan, oo uu Norway na soo gaari doono. Si loo xaddido oo loo hakiyo in cudurku waddanka ku faafo ayaan waxaan soo rogaynaa tillaabooyin badan oo ka hortag ah, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Tillaabooyinka cusub waa:

- Dadka cudurka laga helo oo loo malaynayo in uu ku dhacay nooca omikron, waa loo dheeraynayaa muddada gooni u bixidda oo waxaa laga dhigayaa 7 maalin.
- Karantiil 10 maalin ah ayaa waajib ku ah dadka guri la deggan ama sidaas oo kale ugu dhow dadka looga shakiyay in ay qaadeen nooca omikron. Dadkaan waxaa waajib ku ah in ay tijaabo PCR ah isaga qaadaan sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah – iyo maalinta 7-aad ka hor inta aysan karantiilka ka bixin. Karantiilka way ka bixi karaan, haddii cudurka laga waayo tijaabada maalinta 7-aad.
- Dadka kale ee u dhowaaday dad looga shakiyay in ay qaadeen nooca omikron, waxaa waajib ku ah in ay tijaabo iska qaadaan. Waa in ay tijaabo PCR ah isaga qaadaan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtaggalka ah, ayaga oo iska qaadaya inta u dhexaysa 3 iyo 7 maalin markii ay dadkaas u dhowaadeen kaddib, haddii ay suurtaggal tahayna waa in aanay dad kale

u dhowaannin ilaa inta laga helayo natijada tijaabada koowaad ee cudurka laga waayay.

- Dhammaan tillaaboooyinku way qabanayaan qofka tallaalan iyo midka aan tallaalnayn.
- Waajibaadku meesha waa ka baxayaan haddii gadaal laga soo caddeeyo in cudurka la qaaday uusan ahayn mid uu keenay fayraska noociisa omikron.

Tillaabooyinkii waa dhaqangaleen, waxayna dheeri ku yihiin [tillaabooyinkii soo gelidda waddanka](#) ee ay dawladdu soo rogtay habeenkii sabtida.

– Noocan cusub ee fayrasku wuxuu muujinayaa sida loogu baahan yahay in cirbadda koowaad iyo midda labaad ee tallaalka loo dedejiyo dadka aan welii qaadan iyo in cirbadda xoojinta ah la siiyo dadka u baahan. Hawlaha tallaalka waa in mudnaan la siiyo, ayay tiri Kjerkol.

- [Qeexidda "xubnaha dadka isku guri deggan iyo kuwa sidaas oo kale ugu dhow"](#) [\(FHI\)](#)